

# Hagista shaqo codsashada



## Raadso shaqo

Waxaad si sahal ah uga heli kartaa shaqooyinka bannaan goobaha ay shaqa bixiyayaashu ku soo bandhigaan shaqooyinka bannaan.. Ogeysiisyadaas in aad raadisid waxaad ka billaabi kartaa tusaale ahaan, bogagga internetka ee **Duunitori** (duunitori.fi) tai **bogga xafiiska shada** (magaaladaada.te-palvelut.fi). Sidoo kale bogga **LinkedIn** waa meel wanaagsan oo laga raadiyo shaqooyinka bannaan

Bog kasta waxaad ku xiran kartaa in uu codsigaaga kuu ilaaliyo , marka boggaas lasoo galiyo shaqo ku habboon codsigaaga iyo shuruudahaaga in uu si toos ah kuugu soo wargeliyo.



## Samee ama cusbooneysi CV gaaga

**CV** macnaha **macluumaadkaaga** waa dukuminti ku saabsan macluumaadkaaga muhiimka ah ee shaqo codsade ahaa. Waa ay wanaagsan tahay in aad si taxadar leh u samaysaa CV gaaga iyo in uu cusub yahay, sababtoo ah waa dukumentiga oogu muhiimsan marka shaqo la raadsanayo. CV:ga waa in uu ku xusan yahay macluumaadkaaga, waxyaalaha aad soo baratay, khibraddaada shaqo, iyo luuqadaha aad taqaan.

Waxaad ka soo dejisan kartaa qaab dhismeedka CV ga iyadoo bilaash ah (cvpohja.fi/ilmainen/) ama mid adiga ka samayso boggan Canvalla (canva.com).



## Soo gudbiso codsi shaqo

Ogeysiiska shaqada ayaad ka heli kartaa tilmaamo ku saabsan codsashada, sida shaqada bannaan loo codsado. Badanaa shaqada waxaa loo codsadaa in aad CV gaaga iyo codsigaaga shaqo u dirtid shaqo bixiyaha, ama aad foom diyaar ah ka buuxbuuxisaa internetka.

Codsigaaga shaqo shaqa bixiyaha waxa uu siinayaa aragti ah sababta uu kuu siinayo shaqadan bannaan waxa ay tahay. Codsigaaga shaqo waa in aad ku xustaa hamiga aad u qabtid qabashada shaqadan. Sidoo kale waa in aad xusuusataa in aad ka jawaabtid dhammaan su`aalaha ku xusan wargelinta shaqada bannaan. Waxaad kaloo awoodaa in aad soo dejisato boggan qaab dhismeed diyaarsan oo shaqo codsasho (tyohakemus.org/tyohakemusmalli) iyo in aad ku buuxbuuxisid foomkaas si waafaqsan shaqada aad codsaneyso.



## Isku diyaari wareysiga shaqada

Shaqo bixiyaha waxa uu waraysi oogu yeerayaa codsadayasha ku habboon shaqada. Sida caadiga ah qaar ka mid ah codsadayasha ayaa wareysi lala yeeshaa, sidaa daraadeed waa in aad si taxadar leh u samaysaa CV gaaga iyo codsigaaga shaqo, si wareysiga la guugu yeero. Wareysiga waxa uu noqon karaa mid waji ka waji ah ama taleefan ama barnaamijka Teams ka.

Wareysiga waa in aad isu sii diyaarisaa adigoo ka fikiraya jawaabaha su`aalaha oogu badan ee lays weydiyo. Tusale ahaan su`aalaha inta badan lays weydiyo waxaad ka heli kartaa bogga Duunitori (duunitori.fi/tyoelama/yleisimmat-tyohaastattelukysymykset).

**Rautatienkatu 10**

**Adeegga qaybta  
hore**



**Adeegyada qaybta hore maalmaha shaqada saacadda: 9.00–  
16.00 Rautatienkatu 10, 33100 Tampere**

Isla sartaas ama daartaas waxaad ka heli kartaa xarunta aqoonyahanada caalamiga, taasoo xarunta aqoonyahanada caalamiga (OSKE), International House Tampere iyo Latalinta luuqadaha kala duwan Mainio.

1. Dabaqa koowaad markaad timaaddo waxaa la gugu hagayaa qaybta aad u socotay. Haddaad ballan leedahay si toos ah u kaalay dabaqa 5 aad, qaybta xarunta aqoonyahanada caalamiga OSKE.



**Taleefanka adeegga taleefanka maalmaha shaqada saacadda 9–16**

OSKE +358 41 730 1407

International House Tampere iyo Mainio +358 41 730 2769

Waxaan adeegga ku bixinaa luuqadaha finishka iyo

ingiriiska.

